**Patientinformation**

Ku soo dhawoow qaybta dhalmada
Välkommen till Förlossningsavdelningen

……………….maaalinta(dagen) taariikhad (den)……../………… saacda kl. ……….
(wakhtigu waa mid hordhac ah waana la badeli karaa maalin kasta, taas oo ku xidhan qaliinada kale oo la qorsheeyey)
**Macluumaad loogu talo galey qofka loo qorsheeyey in ilmo lagu qali doono (Information till dig som ska genomgå planerat kejsarsnitt).**
Ka hor qaliinka la qorsheeyey waxaa muhiim ah in si taxadar leh aad u raacdo tilmaamaha sida la isku dhaqayo ee ku lifaaqan, waxaa jidhka oo dhan lagu dhqayaa saabuunta Klorhexidin (Klorhexidintvål) tusaale ahaan Hibiscrub ama Descutan, taas oo ay ulajeedadeedu tahay in la dhimo halista ah in naburku uu qaado infakshan qalinnka ka dib. Isha ugu weyn ee uu infakshanku ka yimaado waa bakteeriyada ku jirta maqaarkaaga.
Qubeyska/maydhashada labalaaban (dubbeldusch) (fadlan fiiri tilmaamaha), waxaa la qubeysanayaa/maydhanayaa laba mar maalinta ha horeysa qaliinka iyo waliba hal mar oo ah subaxnimada qaliinka la sameynayo. Qubeyska/maydhashada ugu horeysa ama kan koowaad waxaa xitaa la dhaqayaa timaha iyada oo lagu dhaqayo saabuun gaar ah. Waa in labada qubeys/maydhasho ay u dhaxeysaa labo saacadood.
Waa in aad xidhataa dhar nadiif ah labada qubeys/meydhasho ka dib, waa in aad isticmaashaa shukumaan/tuwaal nadiif ah mar kasta isla markaan gogasha sariirtun ay ahaato mid nadiif ah.
HiBiscrub/Descutan waxaa laga soo gataa faramashiyaha/farmasiiga.

**Tijaabada aasaasiga (Bastest)** iyo Hb waxaa lagu qaadi doona shaybaarka/rugta daryeelka caafimaadka/qayta qaabilaada ummulisada (Barnmorskemottagningen) 2-3 maalmood ka hor qaliinka sida ku xusan tilmaamaha ay soo dirtey ummulisadaadu. (Jawaabta tijaabooyinka waxaa loo diri doonaa qaybta ummusha) (förlossningsavdelningen).
**Cadeynta xaalada caafimaadka** (**Hälsodeklarationen)** Adiga ayaa buuxinaya isla markaan geynayaa qaybta ummusha.

VÄSTRA GÖTALANDSREGIONEN
NU-SJUKVÅRDEN

**Habeenka qaliinka ka hor (Kvällen före operationsdagen)**
Waa in aad iska jartaa cidiyha, Fadan iska saar/bixi haddii lacala aad haysato dahabka ama qalinka meel jidhka ka mid aha la iskaga duro (piercing). Dahabka kale ee la xidho waa in aad guriga kaga soo tagtaa.
Qubeyska/maydhashada labada mar ah, waa in labada qubeys ay u dhaxeyso ugu yaraan labo saacadood sida ku xusan tilmaamaha.

**Maalinta ummulinta (Förlossningsdagen)**
Qubeyska/maydhashada labada mar ah sida ku xusan tilmaamaha.
Waa in aad qaadata subaxnimada ugu danbeyn marka ay saacdu tahay 06:00 kiniinka Aldon-ka 1.5mg adigaoo ku liqaya biyo.
Waa in aad soomanataa, waxaa sidaa loola jeeda in aanad cunin wax cunto ah iyo cabitaan ah midkoodna wixii ka danbeeya marka ay saacadu tahay 24.00, wax aan ka hayn Alvedon.
Qaybta ummusha waxaa aad kula kulmi doontaa ummulisada gacan qaban doonta adiga iyo lamaanahaaga. Dhakhatarka qaabilsan suuxinta iyo dhakhtarka qaabilsan ummulinta waxaa aad subaxnima, ka hor qaliinka, kula kulmi doontaa qaybta.

**Diyaar galowga qaliinka ka hor (Förberedelser inför operation)**
Qayb ak mid ah shuunka/shicirada waa in la xiiraa. Waxaa kaadi haysta la galinayaa Tuunbo (kateter). Waxaa kale oo laqaadanayaa antibiyootik, kaas oo ay ulajeedadiisu tahay ka hortag oo kaliaya.

**Qaliinka (Operationen)**
Waxaa qolka qaliinka joogi doona shaqaale aad u tiro badan. Mid kastaaba waxaa uu leeyahay oo uu qabsan doona hawla gaar u ah, tuasaale ahaan kalaalisada caafimaadka ee qaabilsan suuxinta agtaada ayey joogi doontaa ilaa inta hawshu socoto oo dhan. Marka dhabarka lagaa kabaabyeynayo mid kamid ah qaraabadaada ama lamaaanahaaga ayaa xagga madaxa ee miiska qaliinka kaa fadhiisan kara, laakiin marka lagu suuxinayo waa uu ka baxayaa qofkaasi qolka qaliinka.
Ummulisadu waxaa ay idin tusi doontaa ilmaha dhashey, ka dinba waxaa ilmaha si wada jir ah ugu gacan qaban doona qol ku dhow qolka qaliinka kaalkaalisada caafimaadka ee caruurta iyo ummulisada. Lamaanaha/qaaraabadu waa ay la joogi karaan marka ilmaha lagu sameynayo baadhitaanka waxaa ayna ka qaadi karaan sawiro. Muddo yar kadi adiga ayaa dib laguugu soo celinayaa ilmaha haddii aad adigu rabto si aad naaska u nuujiso ilmaha.

**Maxaa dhacaya qaliinka ka dib? (Vad händer efter kejsarsnittet?)**
Waxaa aad qaybta ummusha joogeysaa ugu yaraan labo saacadood. Markaas ka dib waxaa laguu badali doonaa qaybta BB-da. Haddii markii qaliinka la smeynayey la isticmaaley dawada wax lagu suuxiyo (narkos) ama hadii miisaankaada siyaado yahay BMI gaada ka sareeyo 40 BMI (>40) ama dhibaatooyin kula soo dareseen waxaa lagugu waardiyeyn doonaa qayb gaaar ah (uppvaksavdelning/UVA) ama IVA. Marka waxaa

ilmuhu intaa la sii joogi doonaa qaybta ummusha ama qaybta BB$^{-da}$ lamaanahaaga/qaraabadaada.Waxaa lagu siin doonaa xanuun baabi'iye haddii aad u baahato Dadka intooda badan waxaa lagu duraa cirbad dhiigga ka dhigta khafiif, si looga hortago in uu dhiig xinjirow yimaado. Marka aad timaado qaybta BB$^{-da}$ aad bey muhiim u tahay in aad kor u soo kacdo sida ugu dhakhsa badan ee ay suuro galu tahay. Sida caadiga wakhtiga dareyeelku wuxuu qaataa qaliinka ka dib 2-4 maalmood.